



**Preble High School**  
Natasha Rowell, Principal  
2222 Deckner Avenue | Green Bay, WI 54302  
Phone: (920) 391-2400 | www.gbaps.org

Jannaayo 2020

Waalidka iyo mas'uulka sharafta leh,

Preble High School Iskuulka waxa ka go'an in uu bixiyo waxbarasho wax ku ool ah oo uu helo arday kasta. Hadafkeena ama yoolkeena waxa weeye inaan xaqiijino in dhammaan ardayda ay diyaar u ahaadaan kulleejo, xirfad ama hawl bulsho. Sida uu sharciga qabo waxaan bixineynaa nuqulkii ugu dambeeye kaarka warbixinta ardayga oo ay bixiso waaxda waxbarashada ee gobolka.

Sida as-aasiga ah kaarka warbixinta ardayda waxa uu leeyahay afar meelood oo mudnaanta la siiyo. Iskuulka iyo degmada waxa ay helayaan dhibco ama buundooyinka qeyb kasta afartaas kamid ah:

- **Hanashada aqoonta ardayga** ee akhriska iyo xisaabta ee qiimeynta gobolka
- **Koritanka/Koboca ardayga** waxa la cabiraa guusha kor ukaca ardayga sanadba sanadka kale.
- **Buuxinta dulduleelada** waxqabadka waxbarasho ee u dhaxeeya koox arday khaas ah (is-barbardhiga bartaha afka ingiriiska, ardayda qoysaska dhaqliga yar ama danleyda ah, ardayda naafada ah ama kuwa kamid ah heyb ama qoomiyad gaar ah ee ardayda kale)
- **U Diyaargarowga Waxbarashada ka Dambeeyso Dugsiga Sare** waxaa lagu cabiraa ayada oo la isticmaalayo qiyaas la isku haleyn karo ee qalinjabinta iskuulada sare iyo hormarka lagaari karo kadib dugsiyada sare.

Natijoyinkani ayaa la isku keenaa waxaana laga abuuraa wada xisaabtan guud ee natijada laga bilaabo 0 ilaa 100. Natijoyinkani waxaa la suraa geeska bidixda ah ee iskuulka ama kaarka natijada waxbarashada. Waxaa muhiim ah in la ogaado in cabirka isla xisaabtanka tirada 0-100 aysan ahayn 'boqolkiiba boqol' cabir sax ah. Natijada waxaa lagu saleeyay hormarka aan suubinay sanadkii tegay ee 2017\_2018 ayada oo la eegayo afarta qodob oo muhiimka ah.

Dugsiyada iyo degmooyinka ayaa sidoo kale lagu qiimeeyaa heerka hawgalinta ardayga\_ heerka ka qeyb galka imtixaanka, heerka maqnaashaha jooogtada ah iyo ka tagista iskuulka marka la adeegsan karo Ayada oo ku saleysan natijada dugsiga ama degmada ee uu helo ardayga oo kala ah shanta qeybood ee qiimeynta ee kala ah; guuldareysiga, gaaray halkii laga rabay, dhaafay halkii laga rabay iyo mid kamid ah shanta xidigood.

DPI ama waaxda waxbarashada dadweynaha ee gobolka waxa ay soo saartay laba nooc oo kamid ah kaarka natijada. Hal bog oo ku magaacaban "Kaarka natijada ee iskuulka" kaasi oo diyaar ku ah websaytka iskuulada ama bogga hore isaga oo dheer oona faahfaahsan laguna calaamadeeyay "kaarka natijada iskuulka oo faahfaahsan" waxaana laga helaa <http://dpi.wi.gov/accountability/report-cards>.

Kaarka warbixinta gobolka waa un qiyaas xogtan aan dib u eegno sida aynu u hormarin laheyn oo aanu u fulino qorshaha guusha dugsiga. Iskuulka Preble High School waxaan mar kasta raadinaa siyaabo joogto ah oo loo hagaajin karo si loo hubiyo in ardayda oo dhan ay guuleystaan. Fadlan xor ayaad u tahayt in aad nala soo xiriirtid haddii aad rabtid in si faahfaahsan lagaala kaarka warbixinta.

Daacadnimo,

Natasha R. Rowell, Principal  
920-391-2400